

Waan codayna yaa!

**13 Sebtembar waa
maalinta doorashada.**

Ka qayb qaado oo saamayn ku
yeelo nolol maalmeedkaaga.
Cod kasta wuxuu xoojinayaa
dimuqaraadiyadda.

Ma codaynasaa adigu?

13 sebtembar waxaa Iswiidhan ka dhacaysa doorasho.

Ka qayb qaado oo saamayn ku yeelo!

Yaa codayn kara?

Waxaad ka codayn kartaa doorashada gobolka iyo tan degmada (dawladda hoose) haddii aad:

- » buuxisay 18 sano,
- » aad ka diiwaangashan tahay degmada
- » oo aad dhalashada iswiidhan haysatid, aad u dhalatay waddan kale oo waddamada midowga Yurub ka tirsan, Aysland ama Norway, ama aad ka diiwaangashanayd Iswiidhan muddo ugu yaraan saddex sano ah ka hor maalinta doorashada.

Doorashada baarlamaanka waxaad ka codayn kartaa haddii aad:

- » buuxisay 18 sano
- » aad tahay muwaadin iswiidhish ah (haysatid dhalashada Iswiidhan)
- » iyo haddii aad ka diiwaangashan tahay ama horay uga diiwaangashanayd Iswiidhan.

Codee maalinta doorashada

Haddii aad xaq u leedahay in aad codaysid waxaa lagu soo diri doonaa kaar codayn qiyaastii saddex asbuuc ka hor maalinta doorashada. Haddii aad leedahay sunduuc boosto elektoroonig ah sida tus. ahaan Kivra waxaa kaarka codaynta lagugu soo dirayaa halkaas. Haddii kale boostada caadiga ah ayaa lagugu soo dirayaa.

Kaarka codaynta waxaa ku qoran meesha aad tagaysid si aad u codaysid. Waxaa sidoo kale halkaas ku qoran doorashooyinka aad xaqqa

u leedahay in aad ka codayso. Soo qaado dukumenti aqoonsi, tusaale ahaan baasaboorka ama kaarka liisanka.

Horay usii codee

Waxaad codayn kartaa maalinta doorashada ka hor. Waxaa loogu yeeraa horay usii codayn. Waxaad horay uga sii codayn kartaa meel kasta oo Iswiidhan ka mid ah, meelaha loogu talo galay codaynta. Soo qaado qaado dukumentigaaga aqoonsiga. Horay usii codayntu waxay soconaysaa inta u dhexaysa 26 agosto illaa iyo 13 sebtembar. Waxaa markaa jiri doona boodhadh laga arkayo meesha aad ka codayn kartid.

Sidee codayntu u dhacdaa? Xagee ka codayn karaa? Ma la iga caawin karaa inaan codeeyo?

goteborg.se/val2026 ayaad ka helaysaa jawaabaha su'aalahaaga ku saabsan doorashada.

Waxaad sidoo kale wici kartaa Xarunta xiriirka Göteborgs Stad si aad warbixin u heshid, lambarka telefoonka **031-365 00 00**

